

HESHIISKA ISKARANTIILIDA IYO XAKAMAYNTA DHAQDHAQAAQA

Aniga, _____, waxaan fahansanahay in la iga helay COVID-19 waxaan qirayaa awooda la siiyay Waaxda Barren River District Health Department (BRDHD) ee KRS 211.180, 214.020, 902 KAR 2:030, 902 KAR 2:050, si looga dalbado inaan u fuliyo talaabooyinka xakamaynta ee soo socota, ee macquul ah iyo lagama maarmaanka u ah kahortaga qaadida, gudbinta, iyo faafitaanka COVID-19 ee gobolkan, dhaqangal ah isla markaana ilaa BRDHD la ogeysiyo in talaabooyinkan la qaaday. :

1. Waxaan ka hubin doonaa Barren River District Health Barren maalin kasta. Inta lagu jiro imaansha kasta, waxaan cabiri doonaa heerkulayga iyo astaamo kasta oo aan arko. Waxaan la socodsiiin doonaa Barren River District Health Department haddii calamadayhaygu ay soo fiicnaanayaan ama ay ka sii darayaan. Waxaan qaadi doonaa heerkulayga qiyaas ahaan waqti isku mid ah maalin kasta.
2. Haddii aan u baahdo inaan raadsado daryeel caafimaad, waan wacayaa marka hore, waxaana u sheegayaa inaan qabo COVID-19. Tani waxay ka caawin doontaa shaqaalaha xafiiska inay ilaaliyaan naftooda iyo bukaannada kale. Haddii ay dhacdo in xaaladdaydu u baahantahay gargaar caafimaad oo degdeg ah, waxaan la socodsiiin doonaa waaxda xaaladaha degdegga ah ee iigu dhow waxaana ku wargelin doonaa xaaladdayda COVID-19 ka hor inta aan loo qaadin xaruntaas.
3. Ilaa iyo intaan u baahnayn isbitaal dhigis, waxaan isku karantiili guriga, anoo yaraynaya dhammaan xiriirka dadka kale sida ugu macquulsan, inta aan astaamaha qabo iyo illaa arren River District Health Department ay iga siideyso karantiilka shaqsi ahaaned. Kama baxayo gurigayga. Ma shaqayn doono, ma xaadiri doono dugsigi, ama mana aadi doono goob kasta oo dadweyne inta lagu gudo jiro waqtigan. Kuma safri doono gaadiid dadweyne ama mid ganacsi.

Intaan guriga joogo, waxaan sii joogi doonaa qol u gaar ah "qofka xannuusan" ama goob ka fog dadka kale iyo xayaawanada, oo ay ku jiraan xayawaannada dab joogta ah. Markay suurtagal tahay, waxaan wax ku cuni doonaa qolkayga/goobtayda waxaanan isticmaali doonaa musqul gaar ah. Waan nadiifin doonaa oo jeermiska ka dili doonaa goobtayda, waxaanan u oggolaan doonaa qof kale oo guriga jooga inuu nadiifiyo oo jeermis ka dilo goobaha guud. Markaan sidan sameeyo, waxaan yareynayaa halista xubnaha qoyskeyga ee u daah-furnaanta joogtada ah inta aan cudurka qabo, taas oo u oggolaaneysa karantiilkooda 14-ka maalmood ah inuu bilaabo.

Marka tallaabooyinkan aan la buuxin karin, xubnaha qoyskeyga waxay ku sugan yihiin halista su daah-furnaaneed, taasoo ka dhigeysa karantiilkoodu inuu sii jiro illaa aan ka bogsado, ka dibna loogu daro 14 maalmood oo dheeri ah. Haddii ay dhacdo inaan u baahdo daryeel bixiye, waxaan fahansanahay in uusan aheyn qof halista sare ugu jira cudur daran ee COVID-19: dadka ka weyn da'da 60 ama dadka qaba xaaladaha caafimaad ee halista ah sida xiiqda, sonkorowga, xaaladda wadnaha, buurnida daran Cudurka kalyaha/sambabaha/beerka, cudurka unuga dhiiga cas, cudurada dhiiga, ama kuwa awoodooda difaaca daciiftay ([cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/need-extra-precautions/groups-at-higher-risk.html](https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/need-extra-precautions/groups-at-higher-risk.html)). Waxaa lagugula talinayaa in daryeelayaashu ay raacaan tilmaamaha CDC si loo xadido halista u daah-furnaanta isla markaana ay u ilaaliyaan naftooda iyo dadka kaleba (<https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/if-you-are-sick/care-for-someone.html>).

4. Waxaan qirayaa hadii aanan awoodin ama aanan u hogaansami karin dhamaan talaabooyinka xakamaynta ee ku taxan qaybaha 1 ilaa 3, in Barren River District Health Department ay ka heli kartaa amar maxkamadeed maxkamada deegaanka ee deegaanka si loo dhaqan-galiyo qodobada heshiiskan.
5. Maxkamadda deegaanka ayaa awood maxkamadeed u leh talaabadan iyadoo la raacayo KRS 211.230.
6. Barren River District Health Departmen waa inay dib u qiimeysaa heshiiskan kahor intaan la go'aamin xilliga muddada karantiilka la qaadi karo.

Heshiiskan wuxuu dhacayaa 21 maalmood kadib soo saaritaankiisa. Heshiiskan ayaa loo soo bandhigay

_____ maalintan _____ ee bishan _____, 2020
(sanadka).

Saxiixa wakiilka Caafimaadka Dadweynaha:

— *Matthew L Hunt*

Magaca wakiilka Caafimaadka Dadweynaha ama qof u xilsaaran: MATTHEW L HUNT, ED.D

Saxiixa qofka la karantiilay _____

Taariikhda la saxiixay _____

Magaca Qofka la Karantiilay _____

SAMPLE
DOCUMENT